Victim Support
Helping people cope with crime

Violence
Information and advice from Victim Support

Gacan ka hadal
Warar iyo talobixin ka imaaneysa Taageerada Dhibbanaha

Waa maxay gacan ka hadal?

Ilaa iyo labo iyo badh malyuun oo dad ah ayaa la weeraraa ama loo hanjabaa sanad kasta. Hanjabaadaha iyo cayda ereyada ah ayaa ah qaabab ka mid ah gacan ka hadalka, si aad ula mid ah weerarka jidh ahaaneed. Gacan ka hadalku meel kasta ayuu ka dhici karaa - guriga, waddooyinka, naadiyada iyo masraxyada, iyo shaqada. Noocyo ka mid ah gacan hadalka, sida gacan ka hadal ee guriga iyo weerarrada cunsuriyadda ku dhisan ayaa kooxo gaar ah oo dad ah saameeya. Badanaa, gacan ka hadalka waxaa sameeya qof uu dhibbanuhu yaqaanno.

In laguu hanjabo ama lagu weeraro waa khibrad cabsi leh. Qofna waa inuusan cabsi ku noolaan. Dad badan ayaa ka naxa sida adeyga leh ee ay u sameeyaan inay noqdaan kuwo loo hanjabay ama la weeraray. Saameynadu waqti dheer ayey jiri karaan, gaar ahaan haddii aad ka baqeysid in mar kale lagu soo weeraro.

Aad ayey u adkaan kartaa in laga hadlo inaad noqotay mid dhaawac loogu geystay gacan ka hadal, laakiin dadka intooda badan waxay ogaadaan inay caawiso inay la hadlaan qof kale oo fahmaya.

Sidee Taageerada Dhibbanuhu wax u caawin kartaa

Victim Support (Taageerada Dhibbanuhu) waa hay'ad samafal oo qaranoo madax bannaan oo loogu talogalay dadka uu denbigu saameeyey. Waxaan caawinnaa kumannaan dhibbaneyaal gacan ka hadal sanad kasta. Mutadawiciinteennu waa kuwo si gaar ah loogu tababaray inay dadka loo hanjabay ama la weerar siiyaan war, caawino camali ah iyo taageero dareen.

Adeeggu waa mid kalsooni leh, lacag la'aan ah isla markaana uu qof walba helayo.

Dhibbaneyaasha denbiga waxaa inta badan uu booliisku la soo xiriirayaa Taageerada Dhibbanaha. Laakiin si toos ah ayaad sidoo kale noola soo xiriir kartaa, haddii aad dooneysid inaad denbi ku wargelisid booliiska iyo haddii akle iyadoon loo eegeyn goorta uu denbi dhacay.

Haddii aad go'aansatid inaad soo sheegtid weerarka, mutadawiciinteennu waxay awoodaan, haddii aad dooneysid, inay kuu raacaan saldhigga booliiska iyo maxkamaddaba. Waxay ku siin karaan

Victim Support
Helping people cope with crime

war ku saabsan qaababka maxkamadda iyo codsiga magdhow. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan inaad la xiriirto ururro kale haddii aad dooneysid caawino nooc kale ah.

Haddii aad tahay qaraabada ama saaxiibka qof loo hanjabay ama la weeraray caawino ayaad sidoo kale naga heli kartaa.

Dadka la dhaawacay

Haddii lagugu dhaawacay weerar mar walba waa caqli inaad raadsatid feejignaan caafimaad. Mararka qaarkood waxaad noqon kartaa mid aad uga dhaawac weyn inta aad rumeysan kartid, gaar ahaan haddii aad naxdin ku jirtid.

Haddii aadan awoodin inaad shaqeysid dhaawacaaga awgiis waa inaad u sheegtid shaqaaleeyaha. Shaqaaleeyahaagu waxaa laga yaabaa inuu ku weydiiyo inaad buuxisid foomka iskaa-u caddeynta ama inaad qoraal bukaan ka doonatid takhtarkaaga ama isbitaalka si ay tustid inaadan fayoobeyn.

Waxaa laga yaabaa in xaq laguu siiyo Statutory Sick Pay (SSP) (Lacag Bixinta Bukaanka ee Sharciga) ah haddii aad bugto afar maalmood ama ka badan. Shaqaaleeyahaagu waxaa laga yaabaa inuu ku siiyo wax badan iyadoo ku xiran heshiiskaaga shaqaaleynta.

War dheeraad ah oo ku saabsan manfacyadu waa diyaar oo laga helaayo Benefits Agency (Hay'adda Manfacyada) (xafiiska deegaanka iyo lambarrada telefoonka lacag la'aanta ah waxaa lagu taxay buugga telefoonnada) ama Citizens Advice Bureau (CAB) (Guddiga Talobixinta Muwaadiniinta) ee deegaanka.

Ku wargelinta denbiga booliiska

Go'aanka ku saabsan in haddii lagu soo wargeliyo denbiga booliiska iyo in kale aday kuu taallaa. Waxaa laga yaabaa inay gacan ka geysato kala hadlidda tan qof kale, sida mutadawaca Taageerada Dhibbanaha, ugu horreyn.

Haddii aad dooneysid inaad codsatid Criminal Injuries Compensation (Magdhow Dhaawac Denbiyeed) waa inaad weerarka isla markiiba booliiska horey ugu wargelisid (waxaa jira war dheeraad ah oo ku saabsan magdhowga oo ku qoran meel danbe oo warqaddaan qoran ah). Haddii kale weerarka dib ayaad mar danbe ka soo sheegi kartaa, haddii aad go'aansatid.

Booliisku waxaa laga yaabaa inuu bayaan kaa qaato waana inuu kuu sheegaa haddii cid la xiray oo loo digay ama denbi lagu oogay.

Mar kasta booliiska u sheeg haddii qofka ku weeraray uu kuu hanjabo ama uu mar kale ku dhibo, iyo xataa haddii aad ka cabsaneysid oo keliya in laga yaabo. Warkaan waxaa laga yaabaa inuu muhiim u yahay go'aannada, tusaale ahaan, codsiga rafcaanka xadgudbaha.

Victim Support
Helping people cope with crime

Marka booliisku qof denbi ku oogo, daliilayuu u gudbinayaa Crown Prosecution Service (Adeegga Xukminta Maxkamadda Denbiyada Culus) kaasoo markaa go'aansan doona in arrinka maxkamad lala aado iyo in kale.

Maxkamad miyaad aadeysaa

Haddii arrinkaaga maxkamadda loo tebiyo, waxaa laga yaabaa inay noqoto dhowr bilood ka hor intaan taariikhda la dejin. Arrimaha badankooda waxaa lagu dhegeystaa maxkamadda deegaanka. Qaar ka mid ah arrimaha daran waxaa lagu dhegeystaa Crown Court (Maxkamadda Denbiyada Culus).

Haddii qof lagu oogo gardarro uuna oggolaado inuu denbiile yahay, waxaa laga yaabaa inaan laguugu yeerin inaad bixisid daliil laakiin waa in laguu sheegaa taariikhda arrinka maxkamadda isla markaana waad soo xaadiri kartaa dhegeysiga, haddii aad dooneysid.

Haddii uu qofku diido inuu denbiile yahay, waxaa caaadi ahaan lagu weydiin doonaa inaad timaaddo maxkamadda si aad daliil uga bixisid wixii dhacay. Booliisku ayaa kuu sheegi doonaa haddii aad u baahan tahay inaad maxkamadda u timaaddo sidii marqaati. Haddii ay taasi dhacdo uma baahnid inaad maxkamadda keligaa aaddid, waxaad caadi ahaan kaxaysan kartaa saaxiib ama qaraabo.

Taageerada Dhibbanuhu waxay hawlgelisaa Witness Service (Adeegga Marqaatiga) ee maxkamad kasta ee denbiyeed ee ku taal Igland iyo Wayles. Adeeggu wuxuu bixinayaa taageero iyo war loogu talogalay dhibbaneyaasha iyo marqaatiyada ku saabsan waxa ka dhacaya maxkamadda.

Adeegga Marqaatigu wuxuu isku duwi karaa booqashooyin lagu tegayo maxkamadda si markaas aad u indho indheysid xukunka ka hor. Waxay sidoo kale kuu heli karayaan meel deggen oo aad ku sugtid ka hor iyo waqtiga dhegeysigu socdaba, waxay sidoo kale gacan ka geysan karaan waxyaabaha kale sida foomamka codsiga kharajka.

Waxaad heli doontaa warqad qoran oo lagu magcaabo *Going to court (Maxkamad aadid)* oo ku saabsan Adeegga Marqaatiga marka laguugu yeero inaad daliil ka bixisid maxkamadda.

Magdhow

Adigoo ah dhibbane gacan ka hadal waxaa laga yaabaa inaad u qalantid Magdhowga Dhaawaca Denbiga, laakiin denbigu waa inuu yahay mid caadi ahaan booliiska loogu wargeliyey iyadoon lala daahin. Taageerada Dhibbanuhu waxay ku siin kartaa war dheeraad ah oo ku saabsan codsiga magdhow waxayna kaa caawin doontaa buuxinta foomka codsiga.

Waxaa laga yaabaa inay jiraan habab aad ku heli kartid magdhow. Maxkamaduhu waxay awood u leeyihiin inay qofka ku weeraray ku amraan inuu magdhow ku siiyo, waana in booliisku wax kaa

Victim Support
Helping people cope with crime

weydiiyaa sida denbigu uu kuu saameeyey si markaas ay maxkamaddu ay haysato macluumaad si ay taas go'aan uga gaarto.

Si ka duwan, waxaa laga yaabaa inaad awooddid inaad qaadatid xukun gaar ah ama qofka aad denbi kaga soo oogtid maxkamad rayid ah si aad u heshid magdhow. Waa inaad talobixin sharci ah ka heshid qareen haddii aad qorsheyneysid inaad sidaad sameysid. Qiimayowga ku baxaya sameynta codsigu way kala duwanaan doonaan. Soo ogow inta ay tahay inaad bixisid ka hor inta aadan gelin heshiiska.

Soo deynta xadgudbeyaasha

Haddii xadgudbaha lagu xukumo xabsi hal sano ah ama ka badan, waa in Adeegga Carbintu ku weydiiyaa haddii aad dooneysid in laguu sheego goorta isaga ama iyada la soo deynayo. Waxaad caddeyn kartaa wixii wel wel ah ee aad taas ka qabi kartid. Wel welkaagu wuxuu saameyn karaa xaaladda soo deynta xadgudbaha. Waa inaad heshaa warqad qoran oo ku saabsan arrintaan oo ka socota booliiska marka xadgudbaha la xukumo ka dib.

Haddii aad jeceshahay in waqtigaa taageero lagu siiyo, laanta Taageerada Dhibbanaha ee deegaankaaga ayaa ku caawin karta.

Si aad u heshid warar dheeraad ah oo ku saabsan Criminal Injuries Compensation (Magdhowga Dhaawaca Denbiga)

Criminal Injuries Compensation Authority,
Tay House, 300 Bath Street,
Glasgow G2 4LN
Telefoon lacag la'aan ah: 0800 358 3601
www.cica.gov.uk

La xiriir laanta Taageerada Dhibbanaha deegaankaaga

Victim Supportline
(Khadka Taageerada Dhibbanaha)

Victim Support
Helping people cope with crime

0845 30 30 900

Khadka Taageerada Dhibbanaha ayaa sidoo kale kula xiriirin kara laanta Taageerada Dhibbanaha deegaankaaga.

Waxaa daabacay Victim Support (Taageerada Dhibbanaha)
Madaxa HRH ee Princess Royal

Victim Support National Office, Cranmer House,
39 Brixton Road, London, SW9 6DZ
Telefoon: 020 7735 9166 Faakis: 020 7582 5712
Shabakad: www.victimsupport.org

Diiwaan gelinta Hay'adda: 298028 Lambarka Shirkadda: 2158780
Waxaa laga diiwaan geliyey Dammaanadda Xaddidan ee Igland
Xafiiska Diiwaan geliyey sida kore.